Qaybta Adeegyada Xanuunada

NHS Greater Glasgow and Clyde

Imaatinka Cisbitaalka

Macluumaadka Bukaanka iyo Dadka Soo Booqda

Somali

Haddii aad doonaysid dokumentigan oo ku qoran Far waaweyn ama maqal ah, fadlan la xiriir: **0141 201 6509**
Haddii aad doonaysid dokumentigan oo ku qoran luqad kale, fadlan la xiriir: **0141 201 6509**

Ma tha sibh ag iarraidh an fhiosrachaidh seo ann an cànan eile, cuiribh fios gu:

Jeśli chcesz uzyskać te informacje w innym języku skontaktuj się z:

Eğer bu bilgiyi bir başka dilde istiyorsanız lütfen bağlantı kurunuz:

اگر آپ یہ معلومات کسی اور زبان میں حاصل کرنا چاہتے ہیں تو براہ مہربانی رابطہ کریں:

ਜੇਕਰ ਤੁਹਾਨੂੰ ਇਹ ਜਾਣਕਾਰੀ ਕਿਸੇ ਦੂਜੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿਚ ਚਾਹੀਦੀ ਹੈ ਤਾਂ ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ ਸੰਪਰਕ ਕਰੋ:

إذا رغبت في الحصول على هذه المعلومات بلغة أخرى، الرجاء الاتصال بـ:

اگر این اطلاعات را به زبانی دیگر میخواهید لطفا با این ادرس تماس بگیرید :

如果您需要该信息的其它语言版本，请联系：

Lambarka Telefoonka: **0141 201 6509**

Lambarrada Xiriirka Telefoon (khadka dhexe)	☎
Blawarthill Hospital	0141 211 9000
The Beatson West of Scotland Cancer Centre	0141 301 7000
Drumchapel Hospital	0141 211 6000
Gartnavel General Hospital	0141 211 3000
Glasgow Homeopathic Hospital	0141 211 1600
Glasgow Royal Infirmary	0141 211 4000
Inverclyde Royal Hospital	01475 633777
Lightburn Hospital	0141 211 1500
Mansionhouse Unit	0141 201 6161
Mearnskirk House	0141 616 3742
Royal Alexandra Hospital	0141 887 9111
Southern General Hospital	0141 201 1100
Stobhill Hospital	0141 201 3000
The Princess Royal Maternity	0141 211 5400
Vale of Leven	01389 754121
Victoria Infirmary	0141 201 6000
Western Infirmary	0141 211 2000

Fadlan isticmaal Qoraalka Text haddii loo baahdo.

Bogga Tusmada **Bogga**

Ka hor imaatinka Cisbitaalka……...5

Imaatinka Cisbitaalka……... 6

- Waxyaabaha aad soo qaadanaysid……...6
- Waxyaabaha ay tahay inaadan soo qaadan…....6

Muddada aad joogtid Cisbitaalka……..7

- Asturnaanta Macluumaadka Caafimaadka……..7
- Marka aad timaadid cisbitaalka…….8
- Waxbarashada Ardayda iyo Cilmi-baarista…...10 Daawada
- Xakamaynta Infekshinka iyo Shaambada……. 11 Nadiifinta Gacmaha
- Beddelaadda Waadhka…… 11
- U wareegista cisbitaal kale……...11
- Degaan Lab iyo Dheddig ka Dhexeeya……..11
- Ixtiraamka Shaqaalaha……12
- Amniga Dabka……12
- Ha ku cabin Siggaar……..12
- Shaqaalaha Bulshada……...12
- Cuntada……...13
- Bixinta Daawooyinka Ilaalsan……..13
- Adeegyada Bukaanka ……..13

Macluumaadka Kale……16

- Faallada iyo Talobixinta……16
- Cabashada…… 16
- Ku Noqoshada Guriga…….. 16
- Booqashooyin Dheeraada……... 17
- Qiimaha Gaadiidka…… 17
- Kaalmada Daryeelaha…….. 18
- Kaalmada Dhaqaale ……19
- Macluumaadka Dadka Soo Booqda ……...19

Fadlan ogaada

Erayada ku jira buug-yarahan ee kala ah ‘Kalkaalisada Sare ama Umulisada’ waxa looga jeedaa qofka mas’uulka ka ah waadhka.

Waxan filaynaa in macluumaadka hoos ku qoran ay tilmaan kuu noqdaan adiga iyo qoyskaaga iyo kuwa daryeelkaaga haya marka aad imanaysid cisbitaalka. Fadlan dhaqso noogu wargeli haddii aad qabtid wax su’aal ah ama walaac ah, shaqaalaha ayaa ku dadaali doona inay ku caawiyaan.

Adeegyada Xanuunnada NHS-ta ee Greater Glasgow iyo Clyde waxa ujeedadoodu tahay:

- Inay haqabtiraan baahidaada caafimaad,iyo
- Inay si joogto ah usii wanaajiyaan tayada iyo adeegyada ay bukaanku heli karaan.

Ka Hor Imaatinka Cisbitaalka

Ku dadaal inaad u sheegtid:

- Qoyskaaga ama asxaabta gaar ahaan kala dardaaran waraaqaha boostada iyo amniga guriga.
- Wasaaradda Shaqada iyo Hawlgabka – haddii aad gunnooyin heshid kala xiriir wixii talobixin ah sababtoo ah joogitaanka cisbitaalka waxay saamayn kartaa gunnada aad heshid.
- Neerasta Degmada iyo Waaxda Shaqaalaha Sooshiyaalka (haddii gacan lagugu siiyo guriga ama daryeelkaleba, iwm) hadba sidii ku habboon.

Fadlan u sheeg waadhka:

- Haddii dhowaanahan xanuuno kugu dhaceen sida qandho, shuban, matag ama finan ama ka soo-bax.
- Haddii aad u baahan tahay qalab khaas ah.
- Haddii aad bixisid daryeel, taasina ay saamaynayso joogistaada cisbitaalka ama markaad guriga ku laabatid.
- Hadii aad u baahan tahay tujumaan ama kaalmo xiriirka ah.

Imaatinka Cisbitaalka

Waxyaabaha aad soo qaadanaysid

Hoos waxa ku qoran liiska waxyaabaha aad soo qaadanaysid:

- Warqadda lagugu dhigayo cisbitaalka
- Dhammaan daawooyinka aad qaadatid sida fitaminada iyo kuwa geedaha ka samaysan. Haddii ay suurtogasho soo qaado liiska dhammaan daawooyinka iyo sida aad u kala qaadatid. Waa suurtogal in daawooyinkaasi lagu siiyo inta aad cisbitaalka ku jirtid.
- Qalabka nadaafadda gaarka ah iyo shukumaan
- Dharka habeenkii iyo bijaamo
- Marada isbitaalka ee korka laga huwado iyo dacas
- Okiyaalo haddii aad isticmaashid iyo galkooda
- Wax aad akhrisatid ama wax kale oo aad isku mashquulisid inta aad joogtid
- Haddii aad wadatid ilkaha macmalka (ilko aan asal ahayn) soo qaado weelka lagu rido oo magacaagu ku qoran yahay
- Qalabka saacida maqalka dhagaha iyo baakadda lagu rido
- Waxyaabaha kale ee shaqaaluhu kuu sheegeen inaad soo qaadatid
- Faahfaahinta ballamaha cisbitaalka ama dhakhtarka ee ku soo aadaya muddada aad cisbitaalka ku sugan tahay.

Khaanadaha dharka lagu xaraysto ee sariirka way kooban yihiin, sidaas darteed soo qaado dhar aad u kooban.

Waxyaabaha ay tahay inaadan soo qaadan
Ha soo qaadan khamri ama walxaha sharcigu diidan yahay, sababtoo ah ma oggolin kuwaas.

Lacagta iyo Alaabada Qiimaha leh
Ha soo qaadan lacag aad u badan, alaabada qiimaha leh, dahab iyo agab kale oo hanta kuu ah.

Cisbitaalku ma aqbalayo mas'uuliyadda wixii hanta ah ee aad weydid ama khasaare gaaro, haddii aan marka hore loo dhiiban shaqaalaha si ay kuugu xafidaan.

- Waa laga yaabaa inaad u baahatid xoogaa lacag ah oo aad u isticmaashid telefoonnada, wargaysyada, iwm.
- Haddii aad soo qaadatid hanti qiimo leh, ama lacag badan meel ayaa laguu dhigi karaa. Fadlan weydiiso Kalkaalisada ama Umulisada si laguugu xafido. Marka aad guriga ku laabanaysid ayaa dib laguugu soo celinayaa, fadlan ogow wixii lacag caddaan ah ee la dhigto waxaan kusoo celinaa iyadoo jeeg ah.
- Xoogaa lacag ah ayaad markiiba la bixi kartaa xilliyada xafiisku furan yahay adigoo aan ogeysiis sii bixin, laakiin waxan u baahanahay ogeysiis 24 saac ah haddii aad lacag badan la baxaysid.

Ambalaaska ama Baabuurka Ambalaaska

Haddii sabab kasta ha jirtee aad u baahatid ambalaas ama baabuurka ambalaaska, shaqaalaha cisbitaalka ayaa kuu qorshaynaya. Maadaama boosasku ciriiri yihiin waxa lagu qaadi karaa oo keliya markii ay jiraan sababo caafimaad.

Haddii aadan u baahnayn ambalaaska ama baabuurka fadlan dhaqso nooga soo wac 0800 389 1333 una sheeg magaca, cinwaanka, telefoonka iyo taariikhda lagu dhigay cisbitaalka.

Muddada aad cisbitaalka joogtid

Asturnaanta Macluumaadka Caafimaadka

Dhammaan shaqaalaha waxa haga Xeerka Anshaxa NHS ee Ilaalinta Asturnaanta Bukaanka.

Haddii aad doonaysid inaad ogaatid sida aan u ilaalino xogtaada caafimaad, fadlan la xiriir Maamulaha Diiwaanka Caafimaadka ee cisbitaalka aad ku sugan tahay ama weydiiso

xubin ka tirsan shaqaalaha nuqul ka mid ah qoraalka tilmaanta.

Marka aad timaadid cisbitaalka
Fadlan imow qaybta ku xusan xaashida lagugu dhigayo cisbitaalka kadibna u dhiib qofka jooga miiska qaabilaadda. Shaqaalaha ayaa xaqiijin doona xogtaada. Qof kasta oo imanaya waadhka waa inuu isticmaalaa **shaambada nadiifinta gacanta** ka hor inta aysan gelin waadhka. (Eeg qaybta Xakamaynta Infekshinka iyo Shaambada Dhaqista Gacmaha).

Qof ka tirsan shaqaalaha ayaa kusoo dhawaynaya marka aad timaadid waadhka. Waxay gacanta kuugu xiri doonaan jijin ay ku qoran tahay xog lagugu aqoonsado waana inaad xirataa goor kasta muddada aad joogtid. Fadlan u sheeg xubin ka tirsan shaqaalaha haddii xogta halkaas ku qoran qaldan tahay, tirmaan ama jijintu kaa dhacdo. Waxay ku tusayaan waadhka waxayna ku weydiin doonaan su'aalo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran:

- Macluumaadka gaarka ah, oo ay ku jiraan qoyska iyo daryeelka kuwa kuu haya, iyo dadka aad doonaysid inay qayb ka qaataan go'aamada ku khuseeya muddada aad joogtid.
- Diiwaankaagii hore ee caafimaadka, xaaladda caafimaad ee xilligan iyo sababta laguu dhigayo cisbitaalka
- Wixii daawo ah ee aad qaadatid
- Wixii infekshin ah ee dhowaan kugu dhacay
- Xogta kugu saabsan, sida asalka qowmiyaddaada
- Wixii hanti ah ee aad cisbitaalka la timid
- Wixii dhib ah ee kaa haysta aragtida, hadalka, maqalka ama naafo kale oo aad qabtid

Wixii dhib ah ee kaa haysta dhaqdhaqaaqa – qalab gaar ah ayaa laguu diyaarin karaa.
- Wixii dhib ah ee kaa haysta wax liqista ama cunto gaar ah oo aad qaadatid haddii ay jirto.

Maxaan samaynayaa haddii aan u baahdo xog dheeraada, talo iyo iyo kaalmo?
Markii aad cisbitaalka joogtid shaqaalaha ayaa ku dadaali doonaa inay wixii karaankooda ah kugu kaalmeeyaan.

Waa siyaasadda cisbitaalka in lagu siiyo daryeel u dhigma baahidaada jidh, maskax, niyad, dhaqan iyo bulsho ahaaneed.

Waa kuwan siyaabo uu cisbitaalku wax uga qaban karo baahidaada shaqsi ahaaneed:

- Bukaanka aan ku hadlin luqadda Ingiriisiga oo loo qabto turjumaano
- Turjumaannada far-fiiqista wax ku gudbiya oo loo qabto bukaanka dhagaha la'
- In lagu siiyo cunto aan ka horimanayn baahidaada diin ahaan iyo dhaqan ahaan intaba
- In laguu diyaariyo Wadaad Cisbitaalka kuugu yimaada oo aad kala hadashid wixii walaac ah ee aad qabtid
- In lagaa caawiyo sidii xubnaha bulshada ama diinta aad haysatid kuu soo booqan lahaayeen
- Laga shaqeeyo sidii Qolal Xasilloon oo Lagu Cibaadaysto (lagu nafiso) ay u heli lahaayeen dadka soo booqda iyo bukaankuba si ay degganaansho ugu helaan
- Bixinta macluumaadka Shaqaalaha Sooshiyaalka haddii loo baahdo.

Muddada aad ku sugan tahay cisbitaalka waxaad codsan kartaa adeegyadan hoose adiga oo la hadlaya kalkaalisada.

Xusuusnow: Shaqaaluhu waxay diyaar u yihiin inay kuu caawiyaan sidii kasta ee suurtogal ah.

Macluumaadka

- Haddii adiga ama qaraabadu doonayaan inay nagala hadlaan daryeelka aad heshid ama daawayntaada dhakhtarka, fadlan balan samayso adiga oo maraya Kalkaalisada, Umulisada ama xoghaynta dhakhtarka.
- Waxan ku weydiisan doonaa oggolaansho wixii daawayn ama hawl kale ah.
- Haddii qaraabada ama qofka haya daryeelkaaga ay noqoto inay go'aan ka gaari karaan daryeelkaaga, oo ay daawayntaadu ku jirto, iyadoo la cuskanayo Xeerka Dadka aan Awoodin fadlan ku wargeli shaqaalaha (tusaale ahaan Awoodda Qareenka, Amarka Soo-dhexgalka ama Amarka Ilaalinta).
- Waxad xaq u leedahay inaad aragtid Diiwaankaaga Caafimaad. Kalkaalisada Sare ama Umulisada ayaa talo kaa siin doona tallaabada aad qaadaysid.
- Waxad xaq u leedahay aragti labaad inaad codsatid wixii arrimo caafimaad ah. Haddii ay taasi lagama maarmaan kuu tahay fadlan ku wargeli dhakhtarka qaybtaada ka hawlgala.
- Haddii aad u baahatid Shahaado Caafimaad waxaad ka heli kartaa kalkaalisada.

Waxbarashada Ardayda iyo Cilmi-baarista Daawada

Qayb muiim ah oo shaqadeenna ka mid ah waa tababarka iyo waxbarashada ardayda, kalkaalisooyinka iyo xirfadlayaasha caafimaadka. Adiga ayaa iska leh go'aanka ah inaad ka qaybqaadatid cilmi-baaris daawo iyo waxbaarshada ardayda. Waxaana arrintan lagu weydiin doonaa ka hor inta aan wadatashi lagaala samayn.

Xakamaynta Infekshinka & Shaambada Nadiifinta Gacmaha
Xakamaynta infekshinka ee cisbitaallada waa muhiim. Si aad gacan uga gaysatid joojinta faafista jeermiska waxaan ka codsanaynaa dhammaan bukaanka, dadka soo booqda ama shaqaalaha galaya kana baxaya waadhka inay isticmaalaan shaambada nadiifinta gacmaha. Tuuji caagga yara ee ay shaambadu ku jirto, kadibna gacmaha wada marso adiga oo is gaadhsiinaya sida marka aad kiriimka marsanaysid oo kale kadibna iyada ayaa iska qallalaysa. Goob kasta oo laga galo waadhka iyo dhammaantiisba waxaad ka helaysaa caagadaha ay ku jirto shaambadaas aad gacmaha marsanaysid. Haddii aad arki weysid ama aadan hubin fadlan weydii xubin ka tirsan shaqaalaha.

Beddellaadda Waadhka
Iyadoo ay qayb ka tahay daryeelkaaga, waxaa suurtogal ah in laguu beddelo waadh kale. Haddii ay taasi dhacdo waxan u sheegi doonaa adiga, qaraabada ama qofka ku daryeelaya.

U wareegista cisbitaal kale
Iyadoo ay qayb ka tahay daryeelkaaga, waxa suurtogal ah in laguu beddelo cisbitaal kale. Haddii ay taasi dhacdo waxan u sheegi doonaa adiga, qaraabada ama qofka ku daryeelaya.

Degaan Lab iyo Dheddig ka Dhexeeya
Muddada aad ku sugan tahay cisbitaalka waxaad joogaysaa qaybta ama waadhka raga ama dumarka hadba kii aad tahay. Hase yeeshee waxaa jirta xilliyo aysan taasi suurtogal ahayn, tusaale ahaan markii ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah oo lagu geeyo qaybta daryeelka xaaladaha khatarta ah. Laakiin goobahaas laftooda daah ayaa loo kala dhaxaysiiyaa sariiraha.

Ixtiraamka Shaqaalaha
Aflagaaddo iyo akhlaaq kale oo xun sida gacan qaad looma adkaysan doono, cisbitaalkana waxaa u furan inay maxkamad la tiigsadaan qofkii akhlaaqdiisa aan la aqbali karin.

Amniga Dabka
Gambaleelka dabka ku dhawaaqa si joogto ah ayaa loo tijaabiyaa. Haddii aad aragtid qiiq ama dab kaco, fadlan degdeg ugu sheeg xubin ka tirsan shaqaalaha. Haddii dab kaco shaqaalaha Kalkaalisada ayaa kuu sheegi doona wixii aad qaban lahayd.

Ha ku cabin Siggaar

Cisbitaalka waxaa u degsan Siyaasad ah inaan lagu Cabbin Siggaarka. Taasi waxay ka dhigan tahay inaan siggaar lagu cabbi karin dhismayaasha NHS, irdaha iyo goobaha laga galo, barxadda cisbitaalka iyo goobta baabuurta la dhigto toona.

Inaad isku dayid joojinta siggaar cabbista waa tallaabada ugu muhiimsan ee aad ku hagaajin kartid caafimaadkaaga. Haddii cisbitaalka lagu dhigayo aadna doonaysid inaad joojisid muddada aad ku jirtid shaqaalaha Kalkaalisada weydiiso xog ku saabsan “Adeegga Joojinta Siggaar-cabbista Bukaanka”.

Shaqaalaha Bulshada
Shaqaalaha bulshada (Social Workers) ayaa jooga haddii aad u baahatid. Waxay talo kaa siin karaan arrimo ay ka mid yihiin:

- Su’aalaha la xiriira Lacagaha iyo Gunnada
- Arrimaha helista shaqada
- Diyaarinta arrimaha gaarka u ah gurigaaga
- Macluumaad inay kaa siiyaan Adeegyada Daryeelka Bulshada ee ay sooshiyaalku bixiyaan

Fadlan xog dheeraad ah weydiiso shaqaalaha waadhka.

Cuntada

Cisbitaalku waxa uu hayaa cuntooyin aad kala dooranaysid. Xog dheeraad ah fadlan akhri buug-yaraha “Macluumaad ku saabsan Cuntada iyo Caafimaadka ee Cisbitaallada “Information about Food and Health in Hospitals” oo aad ka heli kartid waadhka. Waxaad kaloo heli kartaa cuntooyinka xalaasha ah, cuntooyinka yuhuudda iyo dadka khudaarta keliya cuna, waa haddii aad codsatid.

Bixinta Daawooyinka Ilaalsan

Marka aad aragtid kalkaaliso xiran kor-gashi ama midabka basaliga ah ama calaamad odhanaysa ‘protected drug round’ waxay u sheegaysaa shaqaalaha kale, bukaanka iyo dadka soo booqda inay ku mashquulsan yihiin bixinta daawaynta oo aan la carqaladaynin. Haddii aad u baahan tahay gacan in lagu siiyo isticmaal bazarka ama batanka agtaada yaalla waxana kuu imanaya qof ka mid ah shaqaalaha.

Dhar-dhaqashada Bukaanka

Cisbitaalka kuma yaallaan goobo dharka lagu dhaqdo. Waaxda Ilaalinta Caafimaadka Scotland waxay soo saareen qoraalka lagu magacaabo ‘Dharka oo Guriga lagu Dhaqdo; Macluumaadka dadka ku sugan cisbitaalka ama guryaha daryeel bixinta iyo qaraabadooda’. Fadlan weydiiso kalkaalisada nuqul in lagu siiyo.

Adeegyada Bukaanka

Soo Dukaamaysi

Waadhadhka qaarkood ayaa kuu kaxaynaya dukaanka maalin kasta si aad usoo adeegatid. Waxaad soo iibsan kartaa wargaysyo, majallado, cunto fudud, iwm.

Adeegga Wadaaddada

Muddada aad ku jirtid cisbitaalka waxa dhacda inaad doonaysid qof inaad si khaas ah ula hadashid. Waxad kala hadli kartaa arriimaha walaaca kugu haya. Wadaaddada jooga cisbitaalka way ku dhagaysan karaan, waxaadna ka heli kartaa kaalmo niyadeed iyo mid ruuxi ahba oo u furan bukaanka iyo dhammaan dadka soo booqda ee haysta diimaha iyo kuwa aan haysanba. Wadaaddada cisbitaalku waxay joogto u booqdaan waadhka, haddiise aad doonaysid inaad mid si gaar ah ula hadashid u sheeg kalkaalisada inay kuula xiriirto Kooxda Wadaaddada. Sidoo kale Wadaaddada waxaad heli kartaa saacadaha shaqada ka baxsan haddii xaalad degdeg ah jirto. Haddii aad qabtid baahi khaas ah diinta iyo waxyaabaha aad aaminsan tahay awgeed fadlan sheeg cisbitaalkuna waxay ku dadaalayaan in laguu fuliyo. Adeegga Wadaaddada waxay sidoo kale kuu diyaarin karaan inuu kusoo booqdo qof ka socda diinta ama bulshadiina. Maadaama ay qayb ka yihiin adeegga NHS, Wadaaddada Cisbitaalka waxay asturayaan xogtaada sida shaqaalaha kale.

Telefiishanka

Telefiishannada waxay yaallaan qolalka qaarkood maalintii.

Raadiyaha Cisbitaalka

Waadhadhka qaarkood waxay soo tebiyaan Adeegga Raadiyaha Cisbitaalka.

Xiriirka iyo Wada-socodka

Boostada

Waraaqaha ay ku dheggan tahay farankaboollada waxaad ku dirsan kartaa boostada cisbitaalka. Qaraabada iyo axsaabta kale ayaa kuusoo qori kara, sidaas darteed u sheeg inay si cad ugu qoraan baqshadda magacaaga oo buuxa, lambarka waadhka, iyo cinwaanka cisbitaalka.

Telefoonka

Waadh kasta waxa yaalla telefoon lacag lagu rito. Waadhadhka qaarkood waxay leeyihiin telefoon sariirta ku dheggan oo u baahan kaadh telefoon. Kaadhka telefoonka waxaad ka iibsan kartaa waadhka laftiisa.

Moobayllada waxa lagu isticmaali karaa oo keliya meesha loogu talogalay. Goobaha loogu talogalayna waxa ku dheggan calaamad kuu sheegaysa inaad telefoonka isticmaali kartid moobaylka. Shaqaalaha waadhka ayaad sidoo kale weydiin kartaa goobahaasi kuwa ay yihiin. Fadlan ixtiraam u muuji bukaanka kale markii aad moobayl isticmaalaysid. **Si loo ilaaliyo asturnaanta dhammaan bukaanka, telefonnada kaamarada leh waa mamnuuc in lagu qaado wax sawir ah qayb kasta oo ka mid ah cisbitaalka.**

Soo wicitaanka Cisbitaalka

Waa in la yareeyaa soo wicitaanka cisbitaalka, waana in qof keliya oo matalaya qaraabada iyo axsaabta uu soo wacaa cisbitaalka. U sheeg qofkaas inuu dadka intiisa kale gaadhsiiyo xaaladdaada. Fadlan ogow inay xadidan tahay macluumaadka ay shaqaaluhu ku bixin karaan dhinaca telefoonka.

Macluumaadka Kale

Waraaqaha Macluumaadka Caafimaadka

Cisbitaalka gudihiisa waxaad ka helaysaa qoraallo ku saabsan adeegyada, xaaladaha caafimaad, daawaynta, duruufaha khaaska ah iyo Hagaajinta Caafimaadka.
Hay'adda Xuquuqda Macluumaadka Caafimaadka Scotland waxay sidoo kale hayaan qoraallo la xiriira oggolaansho bixinta, asturnaanta iyo helitaanka diiwaanka caafimaadka. Qoraallo kuwaas ka duwan ayaa loogu talogalay bukaanka da'doodu ka yar tahay 16 sano oo ay heli karaan. Waadhka ayaad ka helaysaa nuqullo ka mid ah, fadlan weydii shaqaalaha.

Faallada iyo Talobixinta

Waxaan soo dhaweynaynaa wixii faallo ama talobixin ah ee wax kasta oo ku saabsan joogitaankaaga cisbitaalka. Waan soo dhaweynaynaa ammaan iyo dhalliil labadaba.

Cabashooyinka

Haddii aad cabasho qabtid fadlan la hadal Kalkaalisada Sare iyo Umulisada. Waxaa kaloo jira qoraal kugu hagaya sida cabashada loo sameeyo oo aad ka helaysid waadh kasta. Fadlan weydiiso haddii aad u baahan tahay.

Talosiin madaxbannaan iyo kaalmayn

Xafiiska Talosiinta Muwaadinta (CAB) ayaa ku siin kara talo madaxbannaan iyo kaalmayn qof kasta oo doonaya inuu cabasho sameeyo. Xafiiska CAB cinwaanka iyo telefoonkooda waxaad ka helaysaa buugga telefoonnada.

Ku Noqoshada Guriga

- Waxaan kaala hadli doonaa isku diyaarinta sidii aad guriga ugu noqon lahayd markii aad cisbitaalka ka baxaysid.

- Qoraallo ka hadlaya markii cisbitaalka lagaa sii daayo (ku noqoshada guriga) ayaad ka heli kartaa waddhadhka qaarkood.
- Waxaan kaala hadli doonaa adiga iyo qaraabada haddii ay jirto kaalmayn aad u baahanaysid kadib marka aad cisbitaalka ka baxdid.
- Shaqaalaha kalkaalisada ayaa la socodsiinaya qaraabada iyo axsaabta inaad cisbitaalka ka baxaysid, si ay kuugu diyaariyaan ku noqshada guriga, ama adiga laftaada ayaa diyaarsan kara.
- Qorshaynta Daawaynta – haddii aad cisbitaalka ka baxdid adiga oo daawo qaata waxaa lagu siinayaa daawada aad isticmaali lahayd ugu yaraan 7 maalmood. Sidoo kale waxaa lagu siin doonaa warqad kuu gaar ah iyo mid ku socota dhakhtarka (GP) oo caddaynaysa daawadaas iyo qorshaha aad guriga ugu noqonaysid. Xogta dheeraadka ah ee daawayntaada waxaa loo dirayaa GP-ga.
- Cisbitaallada qaarkood waxay leeyihiin fadhi aad ku sugtid ka hor inta aadan cisbitaalka ka bixin. Waa meesha aad ku sugaysid haddii gaadiid kuu soo socdaan ama inta aad sugayso daawo aad guriga u qaadatid.

Booqashooyin Dheeraada
Haddii aad u baahan tahay ballan bukaan-socod ah markii aad cisbitaalka ka baxdid waxa lagu siinayaa ka hor inta aadan ku noqon guriga, haddii kalena waraaqda ballanta waxa laguugu soo dirayaa boostada.

Qiimaha Safarka
Dhammaan bukaanka ka soo safraya Highlands & Islands waxay codsan karaan in loo celiyo dhammaan kharashkii gaadiidka dadweynaha ee ay ku safreen.

Xaaladaha hoose waxay khuseeyaan oo keliya dadka qaata Gunnooyinka Qoyska, Deeqda Dawladda ama kuwa Dakhdligooda Hooseeya.

- Fadlan la imow caddayn inaad gunnooyinkaas heshid, tusaale ahaan warqad caddaynaysa inaad gunno qaadatid, shahaadada HC2 certificate, Kaadhka Canshuur-dhaafka NHS Tax Credit Exemption Card, Kaadhka Diiwaangelinta Magangelyada Asylum Registration Card (ARC).
- Fadlan ururso tikidhada basaska ama tareennada aad istcimaashid markaad usoo socotid ama ka laabanysid cisbitaalka.
- Sidoo kale bukaanka baabuur ay leeyihiin isticmaalaya waxaan u celin karnaa kharashka shidaalka.
- Xaaladaha qaar kharashka safarka qofka ku kaalmaynaya ayaa la codsan karaa.
- Kharashka takaasida ku baxa laguuma celinayo.
- Fadlan weydiiso kalkaalisada ama umulisada macluumaad dheeraad ah.

Kaalmada Daryeelaha

Ma tahay qof daryeela qof kale? Daryeeluhu waa qofka haya daryeelka lammaane, qaraabo ama saaxiib aan is daryeeli karin sababtoo ah xanuun jira, taagdarro ama naafo darteed. Drayeelaha iyo kan la daryeelayo way isla noolaan karaan ama islama noolaan karaan. Haddii aad ka faa'iidaysanaysid gacan qabasho lagugu siiyo daryeelka aad bixinaysid waxaa ku caawin karta Xarunta Drayeel bixiyaha Xaafadda. Waxay kaa saacidi karaan dhowr waxyaabood, sida: in lagu nasiyo, fasaxyo gaaban, xog iyo talooyin kala duwan, kaalmayn niyadeed iyo inay kugu xiraan kooxaha taageera kuwa daryeelka bixiya.

Macluumaadka ku saabsan Xarunta Daryeel bixiyaha Xaafadda fadlan la xiriir khadka Macluumaadka iyo Kaalmada Daryeelaha oo ah:

0141 353 6504.

Kaalmada Dhaqaale
Waxaa jira dhowr ah Adeegyada Talosiinta Lacagaha oo ku yaalla xaafadda oo talooyin bilaash ah oo asturan kaa siin kara arrimaha dhaqaalaha. Adeegyadan waxay kaa:

- Caawinayaan dalbashada gunnooyinka aad xaqa u leedahay
- Caawinayaan buuxinta foomamka dalbashada gunnada
- Caawinayaan racfaan ka qaadashada go'aannada gunnada khuseeya
- Saacidayaan la macaamilka kuwa daymaha kugu leh
- Eegayaan siyaabaha ay kaaga joojin karaan wixii xisaab celin ee kugu socota
- Caawinayaan la socodka wixii kharash aah ee kaa baxaya
- Ku siinayaan taageero dhinaca sharciga ah

Si aad u heshid Adeegyada Talosiinta Lacagaha ee Sctoland ee kuugu dhow, wac:
0141 572 0237 ama booqo
www.moneyadvicescotland.org.uk

Macluumaadka Dadka soo Booqda
Xilliyada booqashadu way kala duwan yihiin. Fadlan xilliga saxda ah ee waadhkaaga ka hubi Kalkaalisada ama Umulisada.
Dadka soo booqda waa inay raacaan tilmaamahan:

- Fadlan ha soo booqan haddii aad qabtid 'hargab' ama cudurrada kale ee faafa. Haddii aadan hubin, fadlan talo weydiiso xubin ka tirsan shaqaalaha kalkaalisada.
- **Marka aad soo galaysid iyo marka aad ka baxaysid waadhka fadlan isticmaal shaambada gacanta ee la dhigay irridda laga soo galo.** Shaambadaas ku shub gacantaada, kadibna is wada mari adiga oo gacmaha ku masaxaya sida kiriimka oo kale kadibna u dhaaf si ay u qallasho.
- **Halkii mar 2 qof ayaa soo booqan kara sariirtii kastaba.**

- Iyadoo la xakamaynayo faafitaanka cudurrada iyo ilaalinta nadaafadda darteed, fadlan ha ku fadhiisan sariirta balse istcimaal kuraasta lagu siiyey.
- Dhallaanka yar-yar waa in la soo geliyaa oo keliya haddii ay aqbalaan waalidkood iyo Shaqaalaha Kalkaalisada. Fadlan ka hubi ka hor inta aysan imanin. Haddiise loo oggolaado, **carruurta waa inuu la socdaa qof weyn, goor kastana waa in dusha lagala socdaa.**
- Fadlan ixtiraam asturnaanta bukaanka iyo qoysaskooda.
- Maadaama ay bukaan badan jirran yihiin, sawaxanka hoos u dhig.
- Siggaar laguma cabbi karo cisbitaalka iyo barxaddiisaba.
- Haddii aad cunto keenaysid cisbitaalka fadlan wargeli Kalkaalisada Sare ama Umulisada goor hore.
- Booqashada saacadaha ka baxsan xilliyada booqashadu furan tahay waa suurtogal laakiin waa inaad kala shaqaysaa Kalkaalisada Sare ama Umulisada.
- Xayawaanaadka looma oggola cisbitaalka haddii aysan ahayn kuwa haga indhoolayasha ama wax maqalka.
- Fadlan ka hubi shaqaalaha waadhka, haddii ubax la oggol yahay in la keeno cisbitaalka.
- NHS Greater Glasgow and Clyde waxaa u degsan Siyaasad aan u Dulqaadan Gacan ka hadal iyo Xadgudub kale toona. Aflagaaddada iyo akhlaaqda gacan ka hadalka la socdo uma dulqaadanayo cisbitaalku, waxana cisbitaalka u furan in maxkamad la tiigsado qofkii aan akhlaaqdiisa la aqbali karin.
- **Moobayllada waxaa lagu isticmaali karaa oo keliya meelaha la oggol yahay.** Meelahaas waxaa ku dheggan calaamad kuu sheegaysa in loo oggol yahay isticmaalka moobayllada. Sidoo kale shaqaalaha waadhka ayaad weydiin kartaa goobahaas. Fadlan ixtiraama u muuji bukaanka kale markii aad moobaylka isticmaalaysid. **Si loo ilaaliyo asturnaanta dhammaan bukaanka,**

telefoonnada kaamarada leh laguma qaadi karo wax sawir ah qayb kasta oo ka mid ah cisbitaalka.

- Wadaaddada Cisbitaalka ayaa diyaar u ah inay caawiyaan qaraabada bukaanka iyo dadka soo booqdaba. Haddii aad doonaysid inaad la hadashid Wadaaddada Cisbitaalka, fadlan weydiiso shaqaalaha kalkaalisada inay kuula xiriiraan Kooxda Wadaaddada.
- Waxaa jira adeeg basaska ah oo ay raaci karaan dadka soo booqda xilliga fiidnimada ee ku nool gudaha magaalada Glasgow City, Cambuslang, Rutherglen, East Dunbartonshire ama Renfrewshire. Mudnaanta waxa la siinayaa dadka soo booqday ee u safraya cisbitaallada dhow, dadka da'da ah (ka wayn 60 sano), dadka ay u diiwaangashan tahay naafo ama kuwa dakhligoodu hooseeyo. Si aad u buukin garaysatid safarka cisbitaalka kuugu dhow, la xiriir khadka buukin samaynta: 0845 128 4027. Khadadku waxay furan yihiin 1pm ilaa 4pm (Isniin ilaa Khamiis) iyo 1pm ilaa 3.30pm (Jimcaha). Haddii aad u safraysid cisbitaal aan kuu dhowayn fadlan wac khadka buukin samaynta wixii ka dambeeya 3pm.

Designed & Produced by Medical Illustration Services
Tel.: 0141 211 4692
216034